



Jamhuuriyada Somaliland

Golaha Wakiilada JSL



Warbixinta

Wax-qabadkii Golaha Wakiilada

Sanadkii 2013-ka

Contact:-

Somaliland House of Representatives Building
Mobile:- +252-634425218 and +252-634424837

golaha@somalilandparliament.net

Visit our Website www.Somalilandparliament.net or www.Somalilandparliament.com

Warbixinta Sanadkii 2013-kii ee Wax qabadka Golaha Wakiilada

Waxaan halkan idiinku soo gudbineynaa waxqabadka Golaha Wakiilada ee Sanadkii 2013ka oo shaxaysan, si aad u xusuusataan ugana qiyaas-qaadaan qorsheynta hawlaha Golaha ee sanadka 2014ka.

1. Kal-fadhiyada Golaha 2013:-

1.	Kal-fadhigii 20aad	23 Dec. 2013-19 Feb. 2013
2.	Kal-fadhigii 21aad	16 Apr -24 June 2013
3.	Kal-fadhigii 22aad ee aan caadi ahayn	10 Aug.-13 Oct. 2013
4.	Kal-fadhiga 23aad	15-Dec – 2013- 17 Feb 2014

2. Fadhiyada Goleweynaha iyo Gudiyada:-

1.	Fadhiyada Goleweynaha	72 fadhi
2.	Fadhiyada Guddida Joogtada ah	19 fadhi
3.	Fadhiyada Gudiyada Golaha	27 fadhi
Isugeyn Fadhiyada		118 Fadhi

3. Ansixinta Odooroska Miisaaniyada Qaranka ee 2014ka:-

Wuxuu Goluhu Ansixiyay intii lagu jiray Kal-fadhigii 22^{aad} taariikhdu markay ahayd 13/10/2013 Odooroska Miisaaniyada Qaranka 2014ka, Miisaaniyada sanadkan waxay dhan tahay qadar dhan 1,276,033,716000 SL/sh oo u dhiganta dollar ahaan **\$212,672,286** taas oo u kula baxda sidan:-

- Miisaaniyadda dawladda dhexe oo dhan **912,000,000,000** una dhiganta **\$152,000,000**.
- Miisaaniyada Hayaddaha Madaxa Banaan (Banka, Dekkadda, Wakaaladda Biyaha Madbacadda Iyo Korontadda IWM.) oo **dhan 153,197,070,793 SLSH** una dhiganta **\$25,532,846**.
- Dawladaha hoose oo dhan **129,836,638,953** una dhiganta **21,639,440**.
- Deeq ay balan inoogu qaadeen **Denmark Iyo Britain 81,000,000,000 SL/sh** una dhiganta **\$ 13,500,000**.

Waxa Goluhu gaadhay go'aamada iyo talooyinka soo socda oo ka mid ahaa go'aanka ansixinta miisaaniyadda qaranka ee 2014.

Go'aamo

1. In hay'adaha ku jira miisaaniyadda Dawladda Dhexe ee 2014 ee aan Golaha Wakiilada loo soo gudbin xeerarkii lagu aasaasay loogu soo gudbiyo Golaha sagaashan (90) cisho

gudahood, Hay'adda aan lagu soo gudbin xeerkeedana la hakiyo siideynta miisaaniyadeeda ilaa inta Golaha loo soo gudbinayo.

2. In miisaaniyadda laga saaro hay'adaha sharciyadooda ama muddo xileedkoodu dhamaaday sida Gudidda diiwaangelinta ururada siyaasadda iyo Ansixinta Axaabta Qaranka.
3. In laga bilaabo Odoroska miisaaniyadda 2015 la goboleeyo miisaaniyadda dawladda dhexe.
4. In qaybta loogu talo galay mashaariicda horumarinta 2% gobolada Bari iyaga oo mashaariicaysan ka muuqato miisaaniyadda qaranka laga bilaabo 2015.
5. In lacagta loogu talo galay horumarinta wadooyinka la mashruuceeyo laguna muujiyo jaantus muujinayo lacagta wadooyinka kala duwan ee loo qoondeeyey.
6. Inuu Golaha uu hor yimaado Wasiirka Wasaaradda Maaliyadu si sharaxaad dheeraad ah uu Golaha uga siiyo baahida keentay abuurista Khasnadda Guud ee Qaranka uguna iftiimiyo madax xigayaasha khasnadda Guud ee Qaranka.
7. Inuu Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta Qaranku Golaha Wakiilada hor-yimado si uu sharaxaad dheeraad ah uga siiyo dakhliga deeqa caalamiga (UK, Denmark) iyo mashaariicda laga maalgelinayo sanad miisaaniyadeedka 2014 taas oo dhan \$ 13,500,000,= (saddex iyo toban milyan shan boqol oo kun oo dollar keliya).
8. In la ansixiyo siyaasadda miisaaniyadda qaranka iyo odoroska miisaaniyadda qaranka ee 2014 oo dhan Somaliland Shillings 1.267.033.716.000,= (hal triliyan laba boqol lix iyo todoba bilyan, saddex iyo soddon milyan iyo todoba boqol lix iyo toban kun Somaliland Shilin).

Talooyin. Wuxuu Goluhu sidoo kale Miisaaniyada ku ansixiyay talooyinkan soo socda.

1. In siyaasadda miisaaniyadda qaranka ee 2015 mudnaan la siiyo wasaaradaha wax soo saarka sida xoolaha, beeraha, kalluumeysiga iyo Deegaanka lana kordhiyo miisaaniyadooda.
2. Iyada oo la eegayo heerka sicir bararka ee ka jira Somaliland in loo kordhiyo ciidamada qaranka iyo shaqaalaha 40% musharkooda.
3. In dib u eegis lagu sameeyo miisaaniyadda wasaaradaha Maaliyadda, Madaxtooyada, wasaaradda warfaafinta, TV ga Qaranka, Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada iyo Khasnadda Guud ee Qaranka.
4. In dhamaan Hay'adaha madax banaan ay mid kasta muujiso waxay ku soo kordhiso miisaaniyadda qaranka si ay u muuqato inay qarankan waxtar u leedahay oo aanay noqon miisaaniyadahoodu dhakhli iyo kharash isku sar go,an oo keliya.



Sidaa daarted, Wuxuu Goluhu 13/10/2013 Cod aqlabiyad ah ku ansixiyay Miisaaniyadii Qaranka ee 2014ka oo ay ku lifaaqan yihiin Go'aamadan aan kor ku soo xusnay iyo Talooyin

4. Ansixinta Mashaariicd Sharci (Xeerar):-

No	Xeerka	Taariikhda	Loo Gudbiyay
1.	Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada	08/01/2013	Madaxweynaha
2.	Xeerka Statisticska	08/01/2013	Golaha Guurtida
3.	Xeerka assaaska Komishanka Maamul-wanaaga	07/01/2013	Madaxweynaha
4.	Xeerka Waddo-Marista Gaaddiidka	17/02/2013	Madaxweynaha
5.	Xeerka Istaatistikada	07/06/2013	Madaxweynaha
6.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada	23/07/2013	Madaxweynaha
7.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golayaasha Baarlamaanka	02/07/2013	Madaxweynaha
8.	Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddooyinka	24/09/2013	Madaxweynaha
9.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada Madaxweynuhu soo celiyay	02/09/2013	Madaxweynaha
10	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golayaasha Barlamaanka Madaxweynuhu soo celiyay.	02/09/2013	Madaxweynaha
11	Xeerka Booliiska JSL	05/10/2013	Golaha Guurtida
	Xeerka Booliiska JSL	07/12/2013	Madaxweynaha

5. Xeerarka Dhaqangalka Noqdey:-

No	Xeerka
2.	Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada
2.	Xeerka Statisticska

3.	Xeerka assaaska Komishanka Maamul-wanaaga
4.	Xeerka Waddo-Marista Gaaddiidka
5.	Xeerka Istaatistikada
6.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada
7.	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golayaasha Baarlamaanka
8.	Xeerka Takaaliifta Horumarinta Waddoyinka
9.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada Madaxweynuhu soo celiyay
10	Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golayaasha Baarlamaanka Madaxweynuhu soo celiyay.

6. Xeerarka Golaha Guurtida ku maqan:-

Golaha Guurtida wax xeer ah oo sanadkan ku maqanaa ma jirin waxaana ugu dambeeyay Xeer ku maqan Xeerka Booliiska oo ay December 2013 soo Gudbiyeen.

7. Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah:-

No.	Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan
	• Xeerka Midaynta Cashuuraha
	• Xeerka Caymiska Qaranka
	• Xeerka Law of Establishment of Somaliland Agency
	• Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka
	• Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud.
	• Xeerka Maxaabiista
	• Xeerka Gudidda Aasaaska Komishanka Dib u-habeynta shuruucda
	• Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose
	• Xeerka Saxaafada
	• Xeerka Ciyaaraha
	• Xeerka Hay'adda HIV/AIDSka.
	• Xeerka Duulista Madaniga ah
	• Xeerka shidaalka (patroleum Act)
	• Xeerka Macdanta (Mineral Act)

8. Ansixinta Masuuliyiinta Qaran:-

No.	Magaca iyo Xilka Masuulka la Ansixiyey	Xilka Masuulka	T/la ansixiyey
1.	Md. Saleeban Ciise Axmed (xagla-toosiye)	W.Wasaarada Dib-udejinta	
2.	Md. C/salaan Maxamed Xasan	W.ku-xigeenka Wasaarada Macdanta iyo Tamarta	
3.	Md. Nuur Cismaan Guutaale	Wasiir Ku-xigeenka Cadaalada	

4.	Md. Aadan Diiriye Cigaal	Wasiir Ku-xigeenka Ganacsiga	
5.	Md. Maxamed Biixi Yoonis	Wasiirka Arrimaha Dibada	31/08/2013
6.	Md. C/laahi Maxamed Daahir (Cakuse)	Wasiirka Warfaafinta iyo Wacyigalinta	31/08/2013
7.	Md. Aadan Axmed Warsame	Wasiirka Xidhiidhka Golayaasha, Cilmi Baadhista iyo Technology	31/08/2013
8.	Md. Maxamed Jaamac Abgaal	Wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta	31/08/2013
9.	Md. Axmed Cabdi Kaahin	Wasiirka Wasaarada Dib-u dejinta	31/08/2013
10.	Md. Maxamed Muuse Abees	Wasiiru-dawlaha Wasaarada Madaxtooyada	31/08/2013
11.	Md. Bashiir Cabdi Xariir	Wasiir Ku-xigeenka W. Ganacsiga iyo Maalgashiga	31/08/2013
12.	Md. Xasan Daahir Dhimbiil	Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Qorsheynta	31/08/2013
13.	Md. Cabdi Daahir Camuud	Wasiir Ku-xigeenka Gaashaandhiga	01/09/2013
14.	Md. Shugri Xaaji Ismaacill Baandare	Wasiirka Deegaanka iyo reer Miyiga	01/09/2013
15.	Md. Xuseen Axmed Cabdulle	Wasiirka Biyaha	01/09/2013
16.	Md. Cali Jaamac Faarax	Wasiirka Kaluumaysiga	01/09/2013
17.	Md. C/raxmaan Jaamac Cabdulle	Wasiiru Dawlaha Xanaanada Xoolaha	01/09/2013
18.	Md. Cali Maxamed Ahmed (Cali Sandulle)	Wasiir dawlaha iyo Hormarinta Gobolada Bari	01/09/2013
19.	Md. Shukri Xariir Ismaacil	Wasiir K/xigeenka Wasarada Shaqada iyo Arimaha Bulshada	01/09/2013
20.	Md. Aadan Ibraahim Maxamed	Wasiir K/xigeenka Beeraha	01/09/2013
21.	Md. C/waaxid C/qaadir C/raxmaan	Wasiir K/xigeenka Wasaarada Warfaafinta	01/09/2013
22.	Md. Cali Maxamed Warancade	Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada	07/09/2013
23.	Md. Axmed Nuur Faahiye	Wasiiru Dawlaha Waxbarashada	07/09/2013

9. Go'aamada Goluhu Gaadhey:-

No.	Go'aanka Goluhu Gaadhey	Halka loo Gudbiyay	Taariikhda
1.	Ansixinta Xeerka Komishanka Maamul Wanaaga Xeer Lr. 58/2012	Madaxweynaha	07/01/2013
2.	Ansixinta Wasiirka Wasaarada Dib u-dejinta	Madaxweynaha	08/01/2013
3.	Ansixinta Wasiir ku-xigeenaka wasaaada Macdanta, tamarta iyo Biyaha	Madaxweynaha	08/01/2013
4.	Ansixinta Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada Xeer Lr. 61/2013	Madaxweynaha	08/01/2013
5.	Ansixinta Xeerka Istaatisticska (Xeerka statistics law) Xeer Lr. 60/2013	G. Guurtida	08/01/2013
6.	Ansixinta Xeerka Wado-Marista Xeer Lr. 60/2013	G. Guurtida	17/02/2013
7.	Ansixinta Ajendaha Kal-fadhiga 21 ^{aad}	Golaha Wakiilada	27/04/2013
8.	Ansixinta Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada Xeer Lr. 30/2013	G. Guurtida	12/06/2013
9.	Ansixinta Xeerka Istaatisticska (Xeerka statistics law) Xeer Lr. 60/2013	Madaxweynaha	07/06/2013
10.	Ansixinta Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Qareenada Xeer Lr. 30/2013	Madaxweynaha	
11.	Ansixinta Xeerka Maamuuska M/weynaha, M/weyne Ku-xigeenka hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka. Xeer Lr. -----	Madaxweynaha	02/07/2013
12.	Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Ganacsiga Md. Aadan Diiriye Cigaal	Madaxweynaha	02/07/2013
13.	Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Cadaaladda Md. Nuur Cismaan Guuleed	Madaxweynaha	02/07/2013
14.	Ansixinta Anjendaha Kal-fadhiga 22 ^{aad}	G. Wakiilada	24/08/2013
15.	Ansixinta Wasiiru dawlaha Wasaarada Waxbarashada iyo Tacliinta Sare Md. Axmed Nuur Faahiye	Madaxweynaha	07/09/2013
16.	Ansixinta Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha Md. Cali Maxamed Warancade	Madaxweynaha	07/09/2013

17.	Ansixinta Wasiiru Dawlaha Wasaarada Xanaanada Xoolaha Md. C/raxmaan Jaamac Cabdulle	Madaxweynaha	01/09/2013
18.	Ansixinta Wasiir Ku-xigeenka Wasaarada Gaashaandhiga Md. Cabdi Daahir Camuud	Madaxweynaha	01/09/2013
19.	Ansixinta Wasiirka W. Deegaanka iyo reer Miyiga Md. Shugri Xaaji Ismaacill Baandare	Madaxweynaha	01/09/2013
20.	Ansixinta Wasiirka Wasaarada Biyaha Md. Xuseen Axmed Cabdulle	Madaxweynaha	01/09/2013
21.	Ansixinta Wasiirka Wasaarada Kaluumaysiga Md. Cali Jaamac Faarax	Madaxweynaha	01/09/2013
22.	Ansixinta Wasiiru Dawlaha Horumarinta Gobolada Barri Md. Cali Maxamed Ahmed (Cali Sandulle)	Madaxweynaha	01/09/2013
23.	Ansixinta Wasiir ku-xigeenka W. Shaqada iyo Arrimaha Bulshada Md. Shukri Xariir Ismaacil	Madaxweynaha	01/09/2013
24.	Ansixinta Wasiir ku-xigeenka W. Beeraha Md. Aadan Ibraahim Maxamed	Madaxweynaha	01/09/2013
25.	Ansixinta Wasiir ku-xigeenka W. Warfaafinta iyo Wacyigalinta Md. C/waaxid C/qaadir C/raxmaan	Madaxweynaha	01/09/2013
26.	Ansixinta Wasiirka W. Arrimaha Dibada Md. Maxamed Biixi Yoonis	Madaxweynaha	31/08/2013
27.	Ansixinta Wasiirka W. Warfaafinta iyo Wacyigalinta Md. C/laahi Maxamed Daahir (Cakuse)	Madaxweynaha	31/08/2013
28.	Ansixinta Wasiirka W. Xidhiidhka Golayaasha, Cilmi Baadhista iyo Technologyga Md. Aadan Axmed Warsame	Madaxweynaha	31/08/2013
29.	Ansixinta Wasiirka Boosaha iyo Isgaadhsiinta Md. Maxamed	Madaxweynaha	31/08/2013

	Jaamac Abgaal		
30.	Ansixinta Wasiirka W. Dib u-dejinta Md. Axmed Cabdi Kaahin	Madaxweynaha	31/08/2013
31.	Ansixinta Wasiiru Dawlaha W. Madaxtooyada Md. Maxamed Muuse Abees	Madaxweynaha	31/08/2013
32.	Ansixinta Wasiir ku-xigeenka W. Ganacsiga iyo Maalgashiga Md. Bashiir Cabdi Xariir	Madaxweynaha	31/08/2013
33.	Ansixinta Wasiir Ku-xigeenka W. Qorsheynta Md. Xasan Daahir Dhimbil	Madaxweynaha	31/08/2013
34.	Ansixinta Xeerka Maamuuska M/weynaha iyo M/weyne ku-xigeenka hore iyo Mudanayaasha Xeer Lr. Baarlamaanka ee Madaxweynaha ka soo noqdey	Madaxweynaha	02/09/2013
35.	Ansixinta wax-ka-badalka iyo kaabista Xeerka Qareenada Xeer Lr. 30/2004 ee Madaxweynuhu soo celiyay	Madaxweynaha	02/09/2013
36.	Ansixinta Xeerka Takaaliifta Horumarinta Wadooyinka xeer Lr. 64/2013	Madaxweynaha	24/09/2013
37.	Ansixinta Ajendaha Kal-fadhiga 23aad ee caadiga ah	Golaha Wakiilada	21/12/2013
38.	Ansixinta Gudidda Joogtada ah ee Golaha wakiilada	Golaha Wakiilada	21/12/2013
39.	Ansixinta Xeerka Booliiska	Madaxweynaha	--/12/2013
40.	Ansixinta Qorshaha Hiigsiga Golaha Wakiilada JSL	Golaha Wakiilada	31/12/2013

10. Fadhiyada Wadajirtka iyo Khudbad Sanadeedkii Madaxweynaha:-

30/1/2013 oo aheyd Arbaca ayaa Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo** labada Gole ka akhriyay Khudbad Sanadeedkii Madaxweynaha sida Dastuurku dhigayo, Madaxweynaha oo khudbadiisa kaga hadlay dhinacyo badan waxa Mudanayaasha loo qeybiyay iyadoo qoraala oo buug yar laga soo sameeyay ku qoran, khudbadaas oo Madaxweynuhu uu labada Gole ee Barlamaanka JSL uu ka hor akhriyay waxa ka mid ahaa arrimahan soo socda:-

1. Arrimaha Bulshada
2. Siyaasada Arrimaha Dibada
3. Horumarinta Dalka
4. Qorshaha Xukuumada ee sanadka 2013
5. Soo saarista iyo kheraadka dalka iyo
6. In dalku gaadho isku filnaansho xaga Cuntada ah.

11. Waxqabadaka Gudiyada Golaha:-

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga

Wasiirada ay ka soo talo-bixisay waxa ka mid ahaa:-

1. **Md. Aadan Diirley Cigaal** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Ganacsiga
2. **Md. Maxamed Jaamac Abgaal** Wasiirka Wasaarada Boosaha iyo Isgaadhsiinta
3. **Md. Bashiir Cabdi Xariir Wasiir** ku-xigeenka Wasaarada Ganacsiga Masuuliyiinta Gudiddu waxay Xog wareysi iyo Kulamo la yeelatay.

06/08/2013 waxay Kulan Gudiddu wax kaga weydiisay **Md. Sacad Cali Shire** Wasiirka Wasaarada Qorsheynta iyo Horumarinta ka qeybgalkii Shirkii Somaliya loogu ururinayay Dhaqaalaha ee Brussels.

10/8/2013 waxay Kulan Gudidda la yeelatay **Md. Cabdi Aw Daahir** Wasiirka Wasaarada Xanaanada Xoolaha, wuxuuna ku saabsanaa xog-waranka Maxjarka Xoolaha ee Magaalada Berbera.

01/10/2013 waxay Guddidu la kulantay **Md. C/casiis Maxamed Samaale** Wasiirka Wasaarada Maaliyada, Kulankaas oo Gudiddu wax kaga weydiisay Wasiirka Maaliyada Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2014 oo Wasaaradu Golaha u soo gudbisey.

05/10/2013 sidoo kale waxay Guddidu la kulantay **Md. Cali Xoor Xoor** Maareeyaha Dekada Berbera Kulankaas oo Gudidu wax kaga weydiisay ka warbixinta Miisaaniyada Dekada Berbera.

03/10/2013 Guddigu waxay la kulantay **Md. Cabdi Dirir** Gudoomiyaha Baanka Dhexe Isagana waxay Gudiddu wax ka weydiisay odoroska Miisaaniyada 2014 oo Golaha hor yaaley.

Waxay Gudidu muddo kooban haysay odoroska Miisaaniyadda Qaran ee 2014, si ay Gudidu uga gudato waajibaadkeeda Dastuuriga ah. Miisaaniyadu waa halka laga garan karo dhaqaalaha Wadanka iyo isbadalkiisa, iyo siyaasada guud ee xukuumadu dhaqaalaha ka leedahay. Miisaaniyada sanadkaas waxay ahayd qadar dhan **1,276,033,716,000** SLsh oo u dhiganta dollar ahaan **\$212,672,286** taas oo u kula baxda sidan, ugu dambeyn waxay Gudiddu markii ay kulamo kala yeelatay Hay'adihii ay Miisaaniyadu khusaysay waxay soo jeediyeen in la Ansixiyo Odoroska miisaaniyadd sanaddeedka 2014ka.

Dhinaca Xeerarka Waxay Gudiddu ka soo shaqeysay Xeerarka kala ah:-

- Xeerka Takaaliifta Amniga Madaarada
- Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne Ku-xigeenka hore iyo Golaha Baarlamaanka.
- Xeerka Ganacsiga Hawlaha Baananka

Gudidda Joogta iyo Anshaxa

Gudidda Joogtada iyo Anshaxu waxay ka soo talo-bixisay wasiirada soo socda:-

- **Md. Aadan Axmed Warsame** Wasiirka Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha, Cilmi baadhista iyo Technologyga.
- **Md. Maxamed Muuse Abees** Wasiiru dawlaha Wasaarada Madaxtooyada.

Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada

Gudiddu waxay qabatey Public Hearing ku saabsan caqabadihii laga kulmay Diiwaangalintii Codbixiyayaasha, kulankaas oo gudiddu u sameysay dadweynaha waxa ka caawiyay Hay'adda IRI, wuxuuna ka dhacey Hotel Maansoor waxaana ka soo qeybgalay Xisbiyada Qaranka, Gudidda Doorashooyinka, Ururada Arrimaha Bulshada, Madax-dhaqameed iyo Qeybaha kala duwan ee Saxaafada.

Sidoo kale waxaa kulankaas goob-joog ka ahaa hay'addaha deeq bixiyayaasha oo ka mid yihiin EUda, Progresso, IRI iyo DANIDA, waxa kulankaas lagu soo bandhigay caqabadihii ka hor yimi Diiwaangalintii Codbixiyayaasha oo dalka hore looga qabtey oo Markii dambe Golaha Wakiiladu laaley in Doorashooyin dambe lagu galo, iyadoo dood iyo ra'yi isweydaarsi laga yeeshay kulankaas.

Sidoo kale, Gudiddu waxay ka soo talo-bixisay Wasiiradan soo socda oo kala ah:-

- **Md. Cali Maxamed Warancade** Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo Amniga.
- **Md. Cabdi Daahir Camuud** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Gaashaandhiga.
- **Md. Cali Maxamed Ahmed (Cali Sandulle)** Wasiiru dawlaha Arrimaha Gobolada Barri.

Dhinaca Xeerarka Waxay Gudiddu Goleweynaha u soo gudbisey **Xeerka Caasimada.**

Gudidda Arrimaha Dibada, Iskaashiga Caalamiga iyo Qorsheynta

Gudiddu waxay ka soo talo-bixisay Wasiiradan soo socda oo kala ah:-

- **Md. Maxamed Biixi Yoonis** Wasiirka Wasaarada Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
- **Md. Xasan Daahir Dhimbiil** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Qorsheynta Qaranka

Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

Gudiddu waxay ka soo talo-bixisay Wasiiradan soo socda oo kala ah:-

- **Md. C/laahi Maxamed Daahir (Cakuse)** Wasiirka Wasaarada Warfaafinta iyo wacyigalinta.
- **Md. Axmed Cabdi Kaahin** Wasiirka Wasaarada Dib u-dejinta.
- **Md. C/waaxid C/qaadir C/raxmaan** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Warfaafinta iyo wacyigalinta.
- **Md. Shukri Xariir Ismaaciil** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

Gudiddu waxay kulan la yeelatey Wasiirka Madaxtooyada **Md. Xirsi X. Cali Xasan**, kulankaas oo Gudiddu wax kaga weydiinaysay Xeerka Takaaliifta Horumarinta Wadooyinka oo Xukuumadu u soo gudbisay Golaha, waxayna wax ka weydiiyeen baahida Xeerka ee Xiligan iyo ujeedadiisa.

Gudiddu waxay Golaha u soo Gubisey Xeerka **Takaaliifta Horumarinta Wadooyinka** oo Xukuumadu soo gudbisey Markii dambena Goluhu ansixiyay iyo **Xeerka Hay'adda HIV/AIDSka**.

Gudidda Khayraadka Dabiiciga iyo Macdanta

Gudiddu Waxay ka soo talo-bixisay Wasiiradan, Wasiir ku-xigeenada iyo Wasiiru dawlayaashan soo socda:-

- **Md. Xuseen Axmed Cabdulle** Wasiirka Biyaha.
- **Md. Shugri Xaaji Ismaaciil Baandare** Wasiirka Deegaanka.
- **Md. Cali Jaamac Faarax** Wasiirka Kaluumeysiga
- **Md. Aadan Ibraahim Maxamed** Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Beeraha.
- **Dr. C/raxmaan Jaamac Cabdulle** Wasiiru Dawlaha Wasaarada Xanaanada Xoolaha.

Gudiddu waxay ka soo shaqeysay isla markaana Golaha u soo Gubisey **Xeerka Duur joogta iyo Keymaha**

12. Guddi Hawleedyada Goluhu Saaray:-

1. Saddex Guddi hoosaad oo Gaara (Adhoc Committee) ayuu Sanadka 2013ka Goluhu u saaray inay Dib-u eegis ku soo sameeyaan Xeerarka kala ah Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Qareenada, Xeerka Booliiska iyo Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golayaasha Barlamaanka, waxay kal-fadhigii 21^{aad} saddexdaa Guddi ee gaarka ahi

Golaha u soo gudbiyeen isla markaana tala-bixintoodii Golaha ku soo celiyeen, waxay kala ahaayeen Gudiyadaasi:-

- ✓ Gudiddii loo saaray Wax ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Qareenada
- ✓ Gudiddii loo saaray Xeerka Booliiska
- ✓ Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka hore iyo Golayaasha Barlamaanka.

2. Sidoo kale Shir-gudoonku wuxuu Guddi Gaar ah (ad hoc Committee) loo saaray 11 mudane inay soo ururiyaan oo Warbixin Buuxda ka soo sameeyaan saddex fadhi oo xidhan oo Goluhu yeeshay Kal-fadhigii 22^{aad} Gudiddaas oo kala ahaa:-

1. Abdiraxmaan Maxamed Talyanle
2. Ibrahim Axmed Haybe
3. Abdiraxmaan Jaamac Muuse
4. Ali Obsiiye Deria
5. Abdirahman Osman Alin
6. Axmed Abdi Kijandhe
7. Maxamed Cumer Jiir
8. Xaashi Xuseen Caabi
9. Baar Siciid Faarax
10. Maxamed Axmed Obsiye
11. Maxamed Xuseen Xaaji Ciise

13. Wadatashiga Arimaha Deegaanka Green Caucus

kooxda xildhibaanada ah ee loo yaqaan Kooxda Aragti Wadaagta Deegaanka (Green Cocos Team) kooxdan oo kawada tirsan dhamaan Guddiyada uu Goluhu ka kooban yahay hase yeeshee kamidaysan badbaadinta iyo ilaalinta deegaanka ayaa waxa ay kormeer xaga deegaanka ah kusoo mareen dhul balaadhan oo ka kala tirsan Gobolada Togdheer, Saaxil iyo Awdal **09/03/2012** waxaanay kasoo aruuriyeen xog balaadhan oo ku saabsan deegaanka iyo xaalada dadku ku suganyihiinba, Xogtaas oo Xildhibaanadu kasoo heleen deegaankaas oo ay ku dabakhi doonaan sadex Xeer oo Goluhu gacanta ku hayo gaar ahaan Guddida Deegaanka iyo Khayraadka Dabiiciga ah, kuwaas oo kala ah:-

- ◆ National Environment Act (Xeerka Deegaanka ee Qaranka)
- ◆ Wildlife and Forestry Act (Xeerka kaymaha iyo Duurjoogta)
- ◆ Solid Waste Management Act (Xeerka Qashinka Adkaha ah)

Gobolkasta inta meelood ay soo Mareen.

Gobolka Todheer:-

- **Burco (Magaalo madaxda Gobolka Togdheer)**

Wersheda saabuunta (Ilays Detergent Incorporation)
Wersheda Biyaha ee Maaxda (Togdheer Mineral Water)
Xarumaha qashin qubka iyo
Dawladda hoose ee burco

- **Degmada Oodweyne**

Ceel-bilcile
Ceel-xume
Jameecada caynaanshe
Bali-mirawle (Xaaji diiriye)

- **Degmada Qoryaale**

Yasir

- **Degmada War-cimraan**

Qaloocan

Gobolka Saaxil:-

- Berbera Malaala Madaxda Gobolka
- Abdaal
- Lafa-ruug
- Dara-godle
- Bulaxaar
- Xagal
- Laasciidle
- Sheekh
- Biyo-guure (biyo-kulule)

14. Mudanayaashii ka Geeriyooday Golaha 2013ka:-

Intii lagu jirey sanadkii 2013ka Waxaa Golaha Wakiilada ka Geeriyooday Ilaahay ha u naxariistee labada Mudane oo kala aha Md. Aadan Tarabi Oogle iyo Md. Axmed Maxamed Daahir (Axmedweyne).

15. Aqoon korodhsiyo iyo Tababaro:-

27 Oct-07 Nov2013 ayaa Shaqaalaha Baarlamaanka ee labada Gole (Guurtida iyo Wakiilada) waxay Hay'adda IRI tababar aqoon korodhsi ugu qabatey Hotel Maansoor, tababarkan oo ku saabsanaa Dooraka shaqaalaha Sharci dejinta, Dooraka Gudiyada ee hanaanka sharci-dejinta iyo kobcinta aqoonta wax soosaar ee Baarlamaanka Somaliland, aqoon korodhsigan oo ay bixinayeen Macalimiin ka tirsan Shaqaalaha Aqalka Congresska Dalka

Mareykanka oo mudo aad u dheer ka soo shaqeynayay Golaha Sharci-dejinta ee Dalkaasi.



Aqoon korodhsigaas oo Furitaankiisa iyo Soo xidhistiisaba uu ka qeyb-galay Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada **Md. Dr, Cali Yuusuf Axmed**, waxa shaqaalaha labada Gole ee ka qeyb-qaatey tababarkan lagu siiyay Shahaadooyin iyo Buug hage oo ku qoranyihiin waxyaabihii ay 10 maalmood ee ay aqoon korodhsiga ku jireen ku qaateen, tababarkaas oo ahaa mid inta badan la practice gareynayay wixii lagu dhiganayay ayaa ahaa mid Shaqaaluhu aqoon iyo khibrad badan ka korodhsadeen.



Aqoon korodhsigaas oo Xidhitaankiisii uu soo Xidhay Dr. Cali Yuusuf Axmed Gudoomiye ku-xigeenka 2aad ee Golaha Wakiilada, sidoo kale ay ka soo qeyb-galaneen Xidhitaankaas Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle, Mudanayaal ay ka mid yihiin Md. Maxamed Cali Xirsi iyo Md. Cumar Axmed Saleeban (sanweyne) iyo Madaxda Hay'adda IRI, wuxuu Gudoomiyuhu xidhitaankaas ugu mahadnaqay Hay'adda IRI iyo Shaqaalaha labada Gole, wuxuuna Shaqaalaha ku booriyay inay aqoontey 10 casho qaadanayeen ku dabaqaan Shaqada Golayaasha, sidoo kale wuxuu xusay doorka muhiimka ah ee Shaqaalaha baarlamaanka.

16. Hay'adda IRI oo Qalab Ku wareejisay Golaha Wakiilada:-

08/07/2013 waxa hay'adda IRI ay ku wareejisay, Golaha Wakiilada qalab ka kooban:-

1. Laba laptop
2. Hal printer
3. Laba kamaradood (picture and movie)



Kulankaas lagula kala wareegayay qalabka oo lagu qabtay Xafiiska Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ayaa waxa ugu horayn halkaa ka hadlay madaxa hay'adda IRI oo sheegay inay qalabkani uu ka mid yahay caawimada ay siiyaan Goleyaasha Baarlamka oo hay'addoodu la shaqayso, isagoo sheegay inuu rajaynayo in Goluhu si wacan uga faa'idaysan doono qalabkan.

Waxa kale oo isaguna madasha ka hadlay Guddoomiyaha Golaha Wakiilada Mudane C/raxmaan Maxamed C/laahi kaas oo sheegay inay aad ugu mahadnaqayaan Hay'adda IRI qalabkan ay ku caawisay Golaha isaga oo sheegay in qalabkani wax badan ka caawin doono habsami u socodka shaqada Golaha, islamarkaana uu yahay mid loo baahnaa.

Sidoo kale waxa uu sheegay Guddoomiyuhu, in ay jecel yihiin in Hay'addani ay Golaha ka la shaqayso xaga tayaynta (capacity Building) iyo tababarka shaqaalaha.

Intaas ka dibna waxa lala kala wareegay qalabkii iyadoo dhinaca Golaha uu waraaqihii lagula kala wareegayay u saxeexay Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Mudane C/risaaq Siciid Ayaanle.

17. Golaha oo Fadhi Xidhan yeeshay kal-fadhigii 22^{aad}:-

Intii lagu jirey kal-fadhigii 22^{aad} bilowgiisiba sida ajendihii kal-fadhigaas ku xusnayd wuxuu uu yeeshay Goluhu saddex fadhi oo xidhan maalimihii Axadda, Isniinta iyo salaasada ee ku taariikheysnaa 25 ilaa 27 August 2013.

Fadhiga xidhan ee mudanayaasha doodo dhaadheer ka yeeshen

1. Xaalada Guud ee amni iyo nabadgelyo ee Jamhuuriyadda Somaliland.
 - Waxay u jeediyeen baaq nabad-gelyo beelaha walaalaha ah ee shaqaaqadu ku dhex martay degmeda **OOG**, waxay tacsii u direen dadkii ku geeriyooday, kuwii dhaawacmayna waxay eebbe uga baryeen inuu caafimaad degdeg ah siiyo.
 - Waxay kale oo ay shacbiga Somaliland ugu baaqeen inay ilaashadeen nabadgelyada, wada noolaashada iyo wadajirka geesna uga soo wada jeestaan cadawga Somaliland.
2. Arrimaha dhallinyarada, shaqo la'aanta iyo tahriibta.
 - Waxa goluhu ugu baaqay dhallinyarada Somaliland inay dalkooda hooyo aaminaan.
 - Waxa Goluhu ugu baaqay xukuumadda, shirkadaha iyo ganacsatada waaweyna inay sameeyaan mashaariic shaqo loogu abuurayo dhallinyarada.
 - Waxa Goluhu u soo jeediyey xukuumadda iyo shacbiga in si adag loola dhagaalamo shabakadaha dembiilayaasha ah ee ku foogan ama ku hawlan tahriibinta dhallinyarada.
 - Waxa Goluhu isla qaatay inay qayb muhiim ah ka noqdaan wacyi gelinta dhallinyarada ee tahriibta.
3. Maadaama sidaan ka war qabno khasaare badan oo naf iyo malaba lihi ka dhasho dooxyada xili roobaad kasta gaar ahaan dooxyada kuwa u dhaxeeya Hargeysa iyo Berebera, waxa goluhu ugu baaqay deeq bixiyayaasha iyo xukuumadda in loo qorsheeyo dhismo biirjyo (bridges).
4. Waxa Goluhu xukuumadda u soo jeediyey iyada oo fulinaysa ku dhaqanka Dastuurka ay Golaha Wakiilada u soo gudbiso heshiiyada ay gasho.
5. Isaga oo fulinaya wajibkiisa Dastuuriga ah, waxa Goluhu soo jeediyey in la xoojiyo dab galka Xukuumada.
6. Maciishada iyo sicir bararka.
 - Iyada oo heerka shaqo la'aanta shacbiga Somaliland aad u sareeyo, sanadihii ugu dambeeyeyna maciishadu kor u kacaysay sicir barar jooqta ahina jiray, waxa Goluhu baaqa u jeediyey xukuumadda JSL inay qaado talaabooyin lagu xakameynayo sicir bararka iyo ascaarta ama qiimaha badeecadaha
 - Sidoo kalena waxay ganacsatada JSL u soo jeediyeen inay u naxariistaan shacbiga Somaliland ee danyarta ah ee maciishadu ku sii adkaaneyso.
7. Waxa kale oo mudanyaashu dood adag ka yeeshen Wanaajinta iyo tayeynta maamulka Golaha.

- Xoojinta Xil gudashada mudanyaasha iyo ilaalinta saacadaha shaqada
- Dardar gelinta shaqada guddi hoosaayadda Golaha
- Dhamaystirka shuruucda qabyada ah ee Golaha taal

8. Mudanyaasha Goluhu waxay u soo jeediyeen ciidaanka amaanka iyo hay'adda dawladda inay dhawraan dhawrsanaanta iyo maamuuska Dastuurku siiyey mudanyaasha Baarlamaanka JSL.

Intaa ka dib wuxuu Gudoomiyaha Golaha Wakiiladu u saaray Gudidi gaara ah oo isku soo ururisa waxyaabihii Fadhiyadan xidhan Mudanayaashu kaga hadleen Gudidaas oo ka koobneyd 11 mudane waxay yeesheen kulamo dhowra waxayna falaqeyn dheer ka dib soo jeediyeen warbixin ka kooban dhowr qodob oo koobsaneysa waxyaabihii ka soo baxay fadhiyadaas xidhnaa, waxayna kala ahaayeen Mudanayaasha loo saaray.

1. Md. Abdiraxmaan Maxamed Talyanle
2. Md. Ibrahi Axmed Haybe
3. Md. Abdiraxmaan Jaamac Muuse
4. Md. Ali Obsiye Deria
5. Md. Abdirahman Osman Alin
6. Md. Axmed Abdi Kijandhe
7. Md. Maxamed Cumer Jiir
8. Md. Xaashi Xuseen Caabi
9. Md. Baar Siciid Faarax
10. Md. Maxamed Axmed Obsiye
11. Md. Maxamed Xuseen Xaaji Ciise


18. Isku shaandheyntii Gudiyada Golaha:-

Shir-gudoonka Golaha Wakiiladu sida uu dhigayo Qodobada 18^{aad} ee Xeer-Hoosaadka Goluhu, wuxuu sameeyay isku shaandheyn Gudiyada Golaha dhamaantood iyadoo Dhamaan Xubnihii Mudanayaasha ee Gudiyada ku kala jirey la isku wada badalay, mudane kastana Gudidiisii hore laga badalay oo loo badalay Gudi cusub, iyadoo Gudi kasta mudanayaasheedu iska soo dhex doorteen Gudoomiye iyo Xoghaye cusub.


Intaa ka dib 8da Gudi ee Goluhu ka kooban yahay waxay soo doorteen Gudi kastaaba Gudoomiye iyo Xoghaye (Gudoomiye ku-xigeen) waxayna u soo gudbiyeen Shirgudoonka Warqadihii Gudi kasta oo doorashadaas Saxeexeen Mudanayaashu iyo Minuteskii Shirka lagu doortey.

Waxaana 8da Gudi ee Cusub ay iska dhex doorteen Gudoomiye iyo Xoghaye, sidoo kale wuxuu Shir-gudoonku Magacaabay laba Gudi oo cusub oo kala ah Gudidda Hawlaha Guud iyo Gaadiidka iyo Gudidda Sirdoonka iyo Nabadsugida.

Gudiyada Golaha sida ku cad **Qodobka 47^{aad}** ilaa **Qodobka 64^{aad}** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiilada iyo Gudoomiyayaasha Gudiyada waxaa muujinaya Shaxdan hoose:-

No.	Magaca Guddida	Gudoomiyaha Guddida
1.	<p>Guddida Joogtada iyo Anshaxa:-</p> <p>Xilka Guddida Joogtada ah:-</p> <ol style="list-style-type: none"> 1. Tirada guddida joogtada ah waa Saddex iyo toban (13) xubnood ugu yaraan waxaana soo magacaabaaya Gudoomiyaha Golaha wakiilada. 2. Guddida joogtadu waa in ugu yaraan ka mid noqdaa hal mudane (1) oo garyaqaan ahi. 3. Guddiga Joogtadu waxay awood u leeyahay muddada jiritaanka Golaha in uu soo jeediyo: <ol style="list-style-type: none"> b) Wax ka beddel iyo kaabis xeer-hoosaadka Golaha t) Fasiraadda Qodobada Xeer-hoosaadka. 4. Guddida joogtadu waxay u xilsaaran yihiin anshaxmarinta mudanayaasha Golaha wakiilada. 5. Guddida joogtada ahi waxay u xilsaaran yihiin in ay ku sameeyaan xaqiijin xaaladda burin karta xubinnimada mudanaha iyo wixii ka horimanaya masuuliyadda uu xambaarsan yahay mudanuhu. 6. Guddida Joogtada ah waxaa u bannaan inay u gudbiyaan Gudoomiyaha arrimaha loo xil-saaray ee waafaqsan xeer-hoosaadka haddii ay go'aan ka gaadhista uga maarmi waayaan. 7. Guddida joogtada ah waxay eegayaan talooyinka ka soo jeediyaan, dacwadaha Gudoomiyaha iyo ku xigeenadiisa ay ka soo gudbiyaan mudanayaasha. 8. Guddida joogtada ah Waxay u xilsaaran yihiin cabashooyinka arrimaha khuseeya shaqaalaha iyo sharciga shaqaalaha Golaha. 9. Guddiga joogtadu waxay hawlaha Golaha sii wadayaan inta Goluhu fasaxa ku jiro. 10. Guddida joogtadu waxay go'aan ka gaadhaysaa cabashooyinka ay uga soo gudbiyaan mudanayaashu shir-gudoonka ama mudane kale waxana mudanaha la siinayaa xaal-marin ku habboon marka gefku caddaado. 	 <p>Md. Ibraahim Mahdi Buubaa</p>

<p>2.</p>	<p>Guddida Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga:-</p> <p>Shaqada Guddidani waxay noqon doontaa Sidan hoos ku qoran:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ka baaraandegista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda. • Wuxuu darsayaa, kana baaraan degaa soo jeedinta xukuumadda ee ku aadan ku talagalka miisaaniyadda qaranka sanad kasta. • Wuxuu tixgaliyaa hindiso sharciyeedyada uu Golaha u xilsaaro ee arimaha miisaaniyadda iyo maaliyadda. • Wuxuu dib u eegayaa siyaasada lacageed ee xukuumadda JSL. • Wuxuu ka baaraan degaa kharash-miisaaniyadeedka hay'adaha iyo wakaaladaha iyo Wasaaradaha Dawalada. • Wuxuu u kuurgalayaa siyaasadda cashuuraha iyo dakhliga. • Wuxuu ka talo bixinayaa odoroska miisaaniyad sanadeedka qaranka, warbixina ka jeedinayaa gole-weynaha. 	 <p>Md. Cumar Axmed Saleeban (Sanweyne)</p>
<p>3.</p>	<p>Guddida Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka:-</p> <p>Waajibaadka Guddida waxaa ka mida:-</p> <p>La socodka maamulka xukuumadda iyo hay'adaha dawladda ee madaxa banaan, Wakaaladaha, iyo shirkadaha dawladda ee ay isku shaqada yihiin</p> <p>Awoodaha Guddida Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranku waa sidan:-</p> <ul style="list-style-type: none"> • Curinta iyo Diyaarinta xeerar la xidhiidha Maaliyada/Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida Qaranka. • Wax Ka beddelka iyo kaabis ku samaynta xeerarka ku saabsan ilaalinta iyo daryeelka hantida qaranka ee hoos yimada Guddida. • Deraasada warbixin sanadeedka uu Golaha wakiilada u soo gudbiyo Hanti-dhowrka Guud. • Dib u eegidda iyo talo ka bixinta warbixin 	 <p>Md. Maxamed Cali Xirsi</p>

	<p>sanadeedka/Xisaabaadka iyo Qoraalada uu hantidhawrka Guud u Soo gudbiyo Golaha.</p> <ul style="list-style-type: none"> • Diyaarinta warbixin faahfaahsan oo ay ka diyaariyaan warbixinada uu hantidhawruhu uu soo gudbiyo Golaha una gudbiyaan fadhiyada Golaha. • Baadhitaan iyo kormeer joogta ah oo ay ku maraan dhamaan ilaha dhaqaalaha wadanka si ay u hubiyaan wax-soo-saarka goobahaas ugalana dagaalamaan musuqmaasaqa iwm. • U yeedhida Wasaaradaha iyo Hayadaha Dawladda si ay wax uga waydiiso waxqabadkooda iyo Gudashada Xilkooda si waafaqsan qodobada 53^{aad} Farqada 7^{aad} ee Dastuurka Jamahuuriyada Somaliland. • In ay warbixin sanadeed ay ka soo diyaariso adeegsiga iyo Ilaalinta hantida qaranka una gudbiso Golaha wakiilada si u uga soo saaro baaqyo iyo qaraaro ku saabsan Ilaalinta iyo Daryeelka Hantida qaranka. • In ay suurta geliso xeerarka lagu ilaalinayo daryeelka hantida qaranka. • Iyo in ay qabtaan hawlaha kale ee uu ujideeyey Dastuurka iyo xeer Hoosaadka Golaha wakiilada 	
4.	<p>Guddida Cadaaladda, Garsoorka iyo Xuquuqal Insaanka:-</p> <p>Waajibaadka Guddidan waxaa ka mida ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Dejinta iyo kala talo bixinta shuruucda la xidhiidha hawshooda iyo waajibaadkooda. • Xulista xubnaha guddida cadaaladda ka galaya Golaha Wakiilada • dabagalka dhaqan-gelinta shuruucda Goluhu ansixiyey. • La socodka xaaladda Xuquuqal Insaanka JSL iyo siinta warbixino arrintan la xidhiidha Golaha Wakiilada. • La socodka nidaamka garsoorka iyo cadaaladda. • Kormeerka xaaladaha jeelasha iyo siinta warbixino 	 <p>Md. Siciid Cilmi Rooble</p>

	Golaha Wakiilada.	
5.	<p>Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah:-</p> <p>Arrimaha hoos imaanaya guddi hoosaadkan waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ka baaraan degista iyo ka-talabixinta shuruucda la xidhiidha hawshooda iyo waajibaadkooda. • Dhul beereedka iyo siyaasada dhulka • Waraabka. • Kalluunka iyo kheyraadka badda. • Horumarinta reer miyiga, xannanada xoolaha & dhirta iyo daaqa • Ilaalinta Bayadda iyo ilaalinta duurjoogta • Shidaalka, macdanta & biyaha. 	 <p>Md. Siciid Warsame Ismaciil</p>
6.	<p>Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada:-</p> <p>Xilka Guddida waxay tahay:</p> <ol style="list-style-type: none"> a) Ka baaraan degista iyo ka talo bixinta shuruucda la xidhiidha hawlhooda. b) Ka talo bixinta iyo la socodka arrimaha gobolada iyo degmooyinka dalka. c) Ka talo bixinta xidhiidh wanaaga odayaasha dhaqanka iyo maamulista gobolada iyo degmooyinka. d) La socodka arimaha ciidanka booliska iyo hay'adaha amniga. e) La socodka arimaha socdaalka iyo jinsiyada. f) La socodka qorshaha qaran ee maamulida amniga iyo xasilinta dalka. g) Dersida iyo la socodka hawlaha doorashooyinka iyo kormeerida Komishanka doorashooyinka qaranka. 	 <p>Md. Ibraahim Jaamac Cali (Reyte)</p>
7.	<p>Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta:-</p> <p>Arrimaha hoos imaanaya guddi-hoosaadyadan waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ka baaraan degista iyo ka-talabixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waajibaadkooda. • Caafimaadka bulshada. • Siyaasada caafimaadka qaran. • Daryeelka caafimaad iyo caymiska. • Waxbarashada hoose iyo tan sare. • Tababarka xirfadaha iyo waxbarashada aan rasmiga aheyn. • Sayniska & Arrimaha Tiknoolajiyada. 	 <p>Md. Xasan Cawaale Ceynaan</p>

	<ul style="list-style-type: none"> • Dhalinyarada iyo ciyaaraha. • Saxaafadda. 	
8.	<p>Guddida Arr. Dibada, Iskaashiga Caalamiga iyo Qorsheynta Qaranka:-</p> <p>Waaajibaadka Guddida Waxaa ka mid ah:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ka baaraan degista iyo ka talo bixinta shuruucda la xiriirta hawshooda iyo waaajibaadkooda. • Xiriirka caalamiga ah. • Heshiisyada caalamiga ah. • Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha. • Qurbajoogta & Qaxootiga. 	 <p>Md. Axmed Cabdi Nuur (Kijandhe)</p>
9.	<p>Guddida Sirdoonka iyo Nabadgalyada:-</p> <p>Waaajibaadka Guddidan waxaa ka mida:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Ka talo bixinta mashruucyada sharci ee khusseeya siyaasadda difaaca qaranka (defence policies). • Ka talo bixinta mashruucyada sharci ee khuseeya nabad sugidda (intelligence). • War ka siinta Gole-weynaha xaaladaha difaaca iyo nabad sugidda • La shaqeynta iyo dabagalka Hay'addaha qaranka ee qaabilsan difaaca iyo nabad-sugidda • Amniga Golaha Wakiilada. 	 <p>Md. C/karim Aw Cali Shabeel</p>
10.	<p>Guddida Hawlaha Guud iyo Gaadiidka:-</p> <p>Waaajibaadka Guddidan waxaa ka mida:</p> <ul style="list-style-type: none"> • Curinta iyo ka talo bixinta shuruucda la xidhiidha Hawshooda iyo waaajibaadkooda. • La socod xaaladda Guud ee hawlaha (public works) iyo Gaadiidka (transport). • Siinta warbixin gole-weynaha xaaladda guud ee hawlaha Guud iyo gaadiidka. • Curinta iyo ka talo bixinta shuruucda gaadiidka iyo hawlaha guud 	 <p>Md. Axmedyasin Sh. Cali Ayaanle</p>

19. Safardii Dibada:-

Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad **Md. Baashe Maxamed Faarax** ee Golaha Wakiilada Wafti balaadhan oo Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamud Siilaanyo** Hogaaminayo ayaa socdaal ugu baxay Dalka UAE ee khaliijka Carabta, kadib martiqaad ay ka heleen

dalkaas waxayna kulmeen Madaxda kala duwan ee dalkaas iyo Masuuliyiinta qawmiyadaha uu ka kooban yahay wadankaasi,

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada **Md. C/raxman Maxamed C/laahi** ayaa Kulamo kala duwan la yeeshay Barlamanada dalal ka tirsan Qaarada Yurub oo muddadii ugu danbeysay Godoomiyuhu ku sugnaa, waxa ka mida Gudoomiyahaasha Barlamanada Dalaka Sweden, Finland iyo Norway, sidoo kale Wuxuu Gudoomiyuhu ka qeybgalay Kulan balaadhan oo Jaaliyada Dalka Ingriisku u sameysay Waftigii uu hogaaminayay Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamud Siilanyo**.

20. Wufuudihii Golaha iyo Dalka yimi:-

Wafti xilldhibaano ka tirsan Baarlamaanka Dalka Kenya ayaa dalka yimi **05/11/2013**, waftigaas oo ay ka mid ahaayeen mudanayaal ka tirsan Baarlamaanka Kenya oo ay hogaamineysay **Mp. Ana Niyokabe** waxa dalka ku soo dhoweeyay Mudanayaal ka tirsan Golaha Wakiilada waxayna Kulamo la yeeshen Madaxweynaha oo ku qabiley Madaxtooyada, Shir-gudoonka Golaha Wakiilada iyo Guurtida iyo Mudanayasha labada Gole.

10/12/2013, Waxa kale oo Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Md. C/raxman Maxamed C/laahir (Cirro) uu Xafiiskiisa kulan kula yeeshay wafti ka socota Wasaarada Arrimaha Dibada ee Dalka Denmark.



Wafigaas oo uu hogaaminayay **Md. Henrik jesperson** oo ah senior technical advisor-ka Wasaarada Arrimaha Dibada ee dalkaas, waxaa kale oo waftiga ka mid ahaa Marwo **Lote Mindedalla** oo taliye ka ah safaarada Denmark ee Nairobi Kenya iyo **Md. Soren skou Rasmusen** Madaxa hay'adda **DANIDA** ee **Somaliland**.

Waftigaas oo Somaliland u yimi qiimeynta Mashaariicda ay dawlada Denmark Maalgaliso ee ka socda dalka iyagoo mudadii ay jooheen waftigaas soo booqdeen Gobolada Jamhuuriyada Somaliland, Gudoomiyaha Golaha Wakiilada oo waftiga si diiran u soo dhoweeyay wuxuu uga waramay Xaalada horumarka, Amniga, Doorashooyinka iyo Diiwaangalinta Somaliland, wuxuuna u sheegay in shacabka Somaliland si weyn uga mahadnaqayaan dawlada Denmark kaalinta ay kaga jirto mashaariicda horumarineed ee Somaliland ka socda.

Ugu dambeyntii, Madaxa waftigani wuxuu Gudoomiyaha uga waramay; baaxada kaalmada Denmark siiso Somaliland iyo ka qeyb-qaadashada Diiwaangalinta Cod-bixiyayaasha Somaliland ee wakhtigaas in la sameeyo la filayay.

08/12/2013 Gudoomiyaha Golaha Wakiilada Jamhuuriyada Somaliland Mudane **C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)** oo wehiliyo Xoghayaha Guud ee Golaha Mudane **C/risaaq Siciid Ayaanle** ayaa socdaal ku tagay Xarunta Dawlad Deegaanka Soomaalida ee Dalka Ethiopia, kadib martiqaad ay ka heleen Baarlamaanka dalka Ethiopia oo ku marti qaaday ka soo qaybgalka xuska maalinta qoomiyadaha dalkaasi Ethiopia.



Munaasibada Xuskan oo ka dhacday Magaalada Jig-jiga ee Xarunta kilidhka shanaad ee ismaamulka Somaalida itoobiya, markay taariikhdu ahayd **08/12/2013**. Sidoo kale, waxa ka qaybgalay Madaxweynaha Somaliland oo Socdaal Dhulka ah ku gaadhey Jig-jiga.

Appendix A

Liiska Magacyada Mudanayaasha Golaha Wakiilada:-

No.	Magaca	Gobolka	Xisbiga
1.	Abuubakar C/raxmaan Good	Awdal	Kulmiye
2.	C/raxman Maxamed Jaamac	Awdal	Kulmiye
3.	Mahdi Xuseen Cadare	Awdal	Kulmiye
4.	C/laahi Axmed Yuusuf (Madar)	Awdal	UCID
5.	Mahdi Cabdilaahi Maxamuud	Awdal	UCID
6.	Muuse Maxamed Ismaaciil Waabari	Awdal	UCID
7.	C/qaadir Jibriil Tukaale	Awdal	UDUB
8.	Axmeed Barkhad Obsiiye	Awdal	UDUB
9.	Cabdi Maxamuud Jaamac Gaagaale	Awdal	UDUB
10.	Cali Sheekh Ibraahin Araye	Awdal	UDUB
11.	Xasan Muuse Hufane	Awdal	UDUB
12.	Maxamed Barkad Miigane	Awdal	UDUB
13.	Maxamed Yaasiin Sheekh Cali Ayaanle	Awdal	UDUB
14.	Axmed Cabdi Nur Kijaandhe	Hargeisa	Kulmiye
15.	Axmed Ibraahin Daahir (Ax. weyne)	Hargeisa	Kulmiye
16.	Axmed Maxamed Diiriye NacNac -	Hargeisa	Kulmiye
17.	C/laahi Xuseen Cige (Blacky)	Hargeisa	Kulmiye
18.	Cali Yuusuf Axmed Jaamac	Hargeisa	Kulmiye
19.	Ibraahin Axmed- Haybe	Hargeisa	Kulmiye
20.	Maxamed X Maxamuud Cumar- Xaashi	Hargeisa	Kulmiye
21.	Maxamuud Axmed Obsiiye	Hargeisa	Kulmiye
22.	Bashir Sheekh Xuseen Tukaale	Hargeisa	UCID
23.	Cabdiraxmaan Cismaan Caalin	Hargeisa	UCID
24.	Ibraahin Mahdi Buubaa	Hargeisa	UCID
25.	Khadar Aadan Xuseen	Hargeisa	UCID
26.	Maxamed Baaruud Shide	Hargeisa	UCID
27.	Xaashi Xuseen Caabi	Hargeisa	UCID
28.	Aadan Muxumed Hoorri (Mataan)	Hargeisa	UDUB
29.	C/kariim Aw- Cali Shabeel	Hargeisa	UDUB
30.	C/qaadir XIsmaaciil Jirde	Hargeisa	UDUB
31.	Cabdiraxmaan Maxamed Jaamac	Hargeisa	UDUB
32.	Cali Obsiiye Diiriye (Cali Gabiley)	Hargeisa	UDUB
33.	Xasan Cawaale Caynaan	Hargeisa	UDUB
34.	Maxamed Xuseen X Ciisse	Saaxil	Kulmiye
35.	Siciid Cilmi Rooble	Saaxil	Kulmiye
36.	Fu'aad Maxamud Cabdule	Saaxil	UCID
37.	C/raxmaan Maxamed Cabdillahi (Cirro)	Saaxil	UCID
38.	Faarax Maxamuud Cabdulle	Saaxil	UCID
39.	Maxamed Faarax Qabiile	Saaxil	UCID
40.	Aadan Xaaji Diiriye Dirir	Saaxil	UDUB
41.	Axmed Xasan Aadan (Waysocadde)	Saaxil	UDUB
42.	Siciid Cartan Cismaan	Saaxil	UDUB
43.	Maxamuud Jaamac Xaaji Cilmi (Dable)	Saaxil	UDUB
44.	Cabdiraxmaan Yuusuf Cali Cartan	Sanaag	Kulmiye
45.	Cali Maxamed Aadan (Calibarre)	Sanaag	Kulmiye
46.	Ibraahim Jaamac Cali Maxamed (Reyte)	Sanaag	Kulmiye
47.	Maxamed Cismaan Maxamed (Bulqaas)	Sanaag	Kulmiye

48.	C/raxman Maxamed Talyanle	Sanaag	Kulmiye
49.	Axmed Faarax Joorji	Sanaag	UCID
50.	Saleebaan Cawad Cali	Sanaag	UCID
51.	Baar Siciid Faarax	Sanaag	UDUB
52.	Cabdiqaadir Jaamac Xaamud	Sanaag	UDUB
53.	Ibraahin Carraale Cabdi (Ruush)	Sanaag	UDUB
54.	Ibraahin Maxamed Xuseen (Dhaadheere)	Sanaag	UDUB
55.	Maxamed Saalax Cige	Sanaag	UDUB
56.	Axmed Ducaale Bullaale	Sool	Kulmiye
57.	Baashe Maxamed Cabdi	Sool	Kulmiye
58.	Ibraahin Axmed Reygal	Sool	Kulmiye
59.	Maxamed Jaamac Cabdi	Sool	Kulmiye
60.	Cabdiqaadir Askar Xasan	Sool	UCID
61.	Siciid Maxamed Cilmi	Sool	UCID
62.	Aadan Tarabi Oogle	Sool	UDUB
63.	Cabdiraxmaan Muuse	Sool	UDUB
64.	Maxamed Axmed Maxamud (Dhakool)	Sool	UDUB
65.	Maxamuud Dhunkaal Gutaale	Sool	UDUB
66.	Saleebaan Yuusuf Cali Koore	Sool	UDUB
67.	Xariir Siciid Bullaale	Sool	UDUB
68.	Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne)	Tog-dheer	Kulmiye
69.	Maxamed Cumar Aadan	Tog-dheer	Kulmiye
70.	Maxamed Cali Xirsi	Tog-dheer	Kulmiye
71.	Maxamed X Yuusuf Axmed (Waabeeyo)	Tog-dheer	Kulmiye
72.	Xamse Maxamed Gaadaweyne	Tog-dheer	Kulmiye
73.	Cali Xasan Maxamed (Cali-mareexaan)	Tog-dheer	Kulmiye
74.	Jaamac Xasan Aadan	Tog-dheer	UCID
75.	Maxamed Jaamac Cali	Tog-dheer	UCID
76.	Naasir Xaaji Cali Shire	Tog-dheer	UCID
77.	Xuseen Maxamed Cigeh	Tog-dheer	UCID
78.	Axmed Maxamed Nuur Maxamed	Tog-dheer	UDUB
79.	C/casiis Ismaaciil Ducaale	Tog-dheer	UDUB
80.	Cali Xaaji Maxamed Muuse	Tog-dheer	UDUB
81.	Farxaan Maxamed Cali	Tog-dheer	UDUB
82.	Xuseen Ismaaciil Yuusuf	Tog-dheer	UDUB

Liiska Shaqaalaha Golaha Wakiilada:-

No.	Magacayda	Shaqada.
1.	Abdirisaksa'eedayanle	Xoghayaha Guud
2.	Jamal Jama Hassan	Xoghaye ku-xigeenka
3.	Abdi IsmcilXawadle	Ag. Waaxda Maamulka iyo Xisabadka
4.	Ahmed Ali Kahin	La-taliye Sharci
5.	Awad Ali Mohamed	Ag. Waaxda H/qoraalka
6.	Mahamuod Sulamen Omer	Ag. Waaxda ICT
7.	Mustafe Mohamed Dahir	La-taliye Sharci
8.	Abdinasir Osman Mahamoud	Ag. Waaxda Qorsheynta
9.	Hibo Mohamed Ibrahim	Ag. Waaxda Xusuus dhowrka
10.	Ismahan Yusuf Ibrahim	Ag. Waaxda Shaqaalaha
11.	Ahmed Mohamed Eige	Xog. Gudidda Arrimaha Bulshada
12.	Sulieman Abdisar Dubad	Xog. Gudidda Ilaalinta Hantida
13.	Huda Mohamed Ahmed	Xogheynta Xoghayaha Guud

14.	Hamse Mohamed H. Muse	Head of Logistics
15.	Farah Ibrahim Gamute	Xisaabaadka
16.	Sahal Guuleed Xadi	Xogheynta Gudidda Dhaqaalaha
17.	Asiya Rashiid Egge	Xusuus dhowrka
18.	Aydarus Egeh Khayre	Daabacaada
19.	Ali Axmed Ibrahim	Hadal-qoraalka
20.	Ayanle Ahmed Abdi	Xog. Gudidda Joogtada
21.	Yusuf Habib Husein	Xog. Gudida Kh/dabiciga iyo Deganka
22.	Mubarig Farah Warsame	Xog. Gudidda Arrimaha Gudaha
23.	Faysal Ibrahim Cise	Xog. Gudidda Arrimaha Dibada
24.	Abdillahi Abdi Adan	Xog. Gudidda Cadaalada iyo X/insanka
25.	Mohamed Sa'eed Husein	Xisaabaadka
26.	Abdirahman Aydiid Abokor	ICT technical
27.	Mustafe Nuur Faarax	Xafiiska Shaqaalaha
28.	Siciid Jirde Heybe	Camera Man
29.	Ahmed Osman Farah	
30.	Ahmed Farah Bodhle	

C/risaaq Siciid Ayaanle

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

Filename: 2013 Yearly Report
Directory: C:\Users\CAWAD\Documents
Template: C:\Users\CAWAD\AppData\Roaming\Microsoft\Templates\Normal.
dotm
Title:
Subject:
Author: CAWAD
Keywords:
Comments:
Creation Date: 11/01/2017 19:49:00
Change Number: 27
Last Saved On: 06/03/2017 21:41:00
Last Saved By: CAWAD
Total Editing Time: 160 Minutes
Last Printed On: 06/03/2017 23:13:00
As of Last Complete Printing
Number of Pages: 28
Number of Words: 6,681 (approx.)
Number of Characters: 38,083 (approx.)